

Agoosto  
2005

# Daryeelka iyo Caafimaadka ilmaha

Xaashida Macluumaadka waalidka

## La akhrinta Carruurta yaryar

### Maxaad wax ula akhriyaysaa ilmahaaga yar?

- Akhrintu waxay qayb muhiim ah ka tahay koritaanka ilmaha. Kor ula akhrinta ilmahaaga yar waxay ka caawintaa inuu yeesho xirfada loo baahan yahay marka ilmuhu waxbarashada bilaabo. Iskuma deyaaso inaad “barto” ilmahaaga yar inuu akhriyo dugsiga ka hor balse inuu yeesho ilmuhu jacaylka akhrinta buugaagta. Ilmahaagu wuxuu fahmi doonaa sida buuggu u shaqeeyo wuxuuna baranayaa sida ay u noqon karto wax fan ah.
- Kor ugu akhrinta ilmahaagu waxay kaloo ku siisaa waqti aad isku xirantaan oo is barataan. Sawirada iyo erayada ku yaal buugga ayaa idin siin doonaa waxyaalla badan oo aad ka hadasho, ku qososho, fan-na ku siiya, markaad waqtiga wada-qaadanaysaan.

### Goorma ayaad bilaabaysaa inaad ilmahaaga yar la akhrido?

- Ma jirto da’ cayiman oo la bilaabay wax akhriska laakiin marba marka ka horreeyaa ka sii fiican. Dad ayaa leh u akhrinta ilmaha waa in la bilaabo marka uu dhasho, halka kuwa kale leeyihiin waa in la bilaabaa markuu jiro 4 ilaa 6 bilood marka ilmuhu leeyahay kantaroolida madaxa laguna qaban karo dhabta.
- Ilmahaagu waa ka hellayaa inaad ku qabato gacmahaaga, uu dhegaysto codkaaga, aadna la qaybsato sawirada ku yaal buugga, sidaas darteed u bilaw sida ugu dhaqsaha badan.

### Immisa jeer ayaa loo akhriyayaa ilmaha yar?

- Ma jiro nambar go’an oo sheegaya inta jeer iyo intay qaadanayso. Ilmaha yaryari waxay jecel yihiin wax mar walba la sameeyo sidaas darteed waxaa lagu talinayaa in maalin walba loo akhriyo. Wuxuu waqtigaasi noqon karaa waqtiga sariirta, si kasta ha ahaatee waxaa laga yaabaa inaad aragto in ilmahaagu dooranayo waqti go’an iyo buug gaara, sababtoo ah sidaas ayuu jecel yahay.

### Sidee carruurta looga qaybgelinayaa?

- Ilmahaagu wuxuu jecel yahay codkaaga, sidaas darteed, dami telefishanka iyo raadiyaha si ilmahaagu u maqlo codkaaga. Taasi waxay kaloo keenaysaa in wax kale aanay ka weecin in ay adiga buug akhrinta kula qaybsadaan.
- Fadhiisi ilmahaaga meel kuu dhow ama ha ku fadhiisto ruugaaga si u fiican labadiinaba, aadna ku arki kartaan kuna taaban kartaan buugga. Ku dhiirigeli ilmahaaga inuu tilmaamo waxa buugga ku yaal, una ogolow in ilmuhu rogo boggaga.
- U ogolow in ilmahaagu doorto buugga la akhriyayo. Waxaa laga yaabaa inaad jeclaato inaad isla buuggii dhowr jeer akhrido, sababtoo ah mar walba waxay garanayaan hadalka soo socda qaybna way ka qaadan karaan. Mallay siduu ilmahaagu ugu farxaayo ugana hellayo markuu kuu sheegayo erayga jumladu ku dhamaato ama ay kuu sharxayo waxa soo socda. Carruurta waxay jecel yihiin waa isbedelaa markay koraanba, sidaas darteed way sahlana tahay in loo ogolaado inay doortaan buugga kulana wadaagaan waxay xiisaynayaan.
- La cayaar waxyaallaha lagu cayaaro fanna la qaado. Waxaad isticmaali kartaa buugga si aad u bilawdo xarakaadyo badan. Ilmahaaga yari wuxuu jeclaan lahaa in wax loo akhriyo sida sheekada buuggu u dhawaaqayso, ama si la jaan qaadi karta buugga. Waxaa jira sheekooyin run ahaan heeso ah.
- Weydii su’aallo una tilmaan waxa ku yaal buugga. Ka caawin ilmahaaga inuu raadiyo waxa buugga ku yaal. Weydii inay dadka tusaan oo weydiiyaan waxay yaqaaniin oo horay u arkeen, midabada ay arkeen, tirina waxyaallaha bogga ku yaal.
- Maktabada isku qor. Booqo qaybta maktabada oo ay yaalliin buuggaagta muujiya dal marnimada. Ilmahaagu wuxuu ka hellayaa kala doorashada wuxuuna hellayaa buuggaag uu kala doorto. Waxaad kaloo awoodaa inaad aado xiisadaha “kor u akhrinta” oo lagu qabto maktabada. Tani waxay tusaysaa ilmahaaga inay jiraan dad badan oo jecel akhrinta waxayna helli karaan waxyaalla badan oo fan ah.

**Taladaan ku saabsan u akhrinta buuggaata carruurtaada yaryar waxaa kuu keenay barnaamijka *Let's Read. Let us Read waxaa sameysay Xarunta Bulbada ee Caafimaadka Ilmaha oo ay wada shaqaynayaan Smith Family. Waxaad macluumaad badan ka helli kartaa websaytka [www.letsread.com.au](http://www.letsread.com.au)***

Xaashidaan Xaqiiqda Waalidka waa la helli karaa iyadoo ku qoran luqada badan waxaana lagala soo bixi karaa ama laga daabacan karaa websaytka Early Childhood Connections oo ah. [www.econnections.com.au](http://www.econnections.com.au)



Dadaalka

Waxaa taageeray



SOMALI